



Nozibele iyo saddexdii!

timo



Tessa Welch ✎
Wiehan de Jager ✎
Abdi Muse 📄
3 ||
Soomaali! ☺




Global Storybooks

globalstorybooks.net

Nozibele iyo saddexdii! timo

Tessa Welch ✎
Wiehan de Jager ✎
Abdi Muse 📄




This work is licensed under a Creative Commons Attribution 3.0 International License.
<https://creativecommons.org/licenses/by/3.0>






Wakhti dheer ka hor, saddex
gabdhood ayaa u baxay inay soo
guurtan qoryo.



Waxay ahayd maalin kulul sidaa
darteed waxay aaden webiga si ay
ugu soo dabaashaan. Way cayaa-
ren waxayna firdhiyeen kuna
dabaasheen biyaha.



Dabadeed eeygi waxuu ogaaday in
Nozibele ay sirtay. Sidaas darteed
eeygi waxuu orday oo ku orday
wadadi illaa iyo tuulada. Laakiin
walaalaha Nozibele ayaa halkaas ku
sugayay iyagoo uo waaweyn. Eeygi
wuu jeestay oo wuu cararay,
walgiiisna dib looma arag.



Si kadis ah, waxay xaqiiqsadeen in ay yihiin kuwa daahay. Waxay dib ugu soo dagdageen tuulada.




Markii eygii dib u soo laabtay, wuxuu raadiyay Nozibele. “Nozibele, xagee baad joogtaa?” ayuu ku qayliyey. “Waa ikan, sariirta hoosteeda,” ayay tiri tintii ugu horraysay. “Waa ikan, albaabka ka gadaashiisa,” ayay tiri tintii labaad. “Waa ikan, gudaha xerada,” ayay tiri tintii saddexaad.

Markii ay ku dhawaadeen guriga,
 Nozibele waxay saartay
 gacanteeda qoorta. Waxay soo
 iloowday silsiladeedii "Fadlan ila
 laabta!" ayay ka bariday
 saaxiibadeeda. Laakiin
 saaxiibadeeda waxa ay dhahdeen
 waa xilli aad u dambe.



Dhakh-saba sidaas tuu eeyga u
 tagay, Nozibele ayaa madaxa ka
 soosii-btay saddex timood. Waxay
 hal tin dhigtay sarirta hoosteeda,
 mid kalane albaabka gadaashiisa,
 midna gudaha xerada. Kadibna
 waxay u carartay guriga sida ugu
 dhakh-saha badan oo ay awooday.







Sidaas darteed Nozibele ayaa kaligeed dib ku laabatay webiga. Way heshay silsiladeedi waxayna usoo dhaqsatay guriga. Laakiin waxay ku luntay mugdiga.




Maalin kasta waxay ku qasbanayd in ay wax kariso, nadiifiso oo u dhaqdo eeyga. Dabadeedna, maalin aya eeygii yidhi, “Nozibele, maanta waa in aan booqdaa saaxiibo, nadiifi guriga, cuntada kari, oo dhaq alaabta kahor intaan soo laaban.”



Meel fog waxay ka aragtay iftiin ka
imaanayo aqal. Waxay u dhakhsatay
dhinacisa waxayna garaacday
albaabka.



Kadib eeygi! wuxuu yidhi, "Sariirta !!
hagaaji!" Nozibele ayaa ku
jawaabtay, "Waligay marna sarir
uma hagaajinin eey." "Sariirta
hagaaji, ama waan ku qaniini
doonaa!" ayuu eeygi yidhi. Sidaas
darteed Nozibele way hagaajisay
sariirti.



La yaabkeda, ey aya ka furay albaabka oo ku yidhi, “Maxaad doonaysaa?” “Waan lumay waxaana u baahanahay meel aan seexdo,” ayay Nozibele tidhi. “Soogal, ama waan ku qaniini doonaa!” ayuu yidhi eygi. Sidaas darteed Nozibele way gashay gudaha.



Kadib eeygii wuxuu ku yidhi, “Cunto ii kari!” “Laakiin waligay marna wax uma karrinin eey,” ayay ku jawaabtay. “Kari, ama waan ku qaniini doonaa!” ayuu eeyga yidhi. Sidaas darteed Nozibele waxeey xoogaa cunto ah u karisay eeygii.